


JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية
مكتب تيو لتوثيق العقود
والإستشارات الشرعية
مقديشوا - الصومال



SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA
(CRYSTAL TECHNOLOGIES COMPANY)



CRYSTAL
TECHNOLOGIES

MUQDISHO-SOOMAALIYA

2024



UJEEDO:- DHISID SHARCIGA SHIRKADDA CRYSTAL TECHNOLOGIES COMPANY

Maanta oo ay taariikhdu tahay **06/08/2024**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Kooraad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa ii yimid Mudanaha hoos ku Xusan:-

1- **ABUBAKAR ELMI YUSSUF**, Somali ah, ina Gamana Haji Hussein Ku Dhashay Garrisa Sanadkii 1984, Lehna Warqada Sugnaan No.664731/D/hoose ee Muqdisho Ahna Milkiilaha Shirkadda.

Mudanaha kor ku xusan isago oo caafimaad qaba, caqligiisuna taam yahay, cid heshiisnaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, Wuxuu i weediistay inaan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Shirkadeed oo ka kooban qodobada hoos ku qoran:-

QODOBKA 1-AAD

MAGACA IYO ASTAANTA SHIRKADDA
MAGACA SHIRKADDA:- CRYSTAL TECHNOLOGIES COMPANY



QODOBKA 2-AAD

WAQTIGA LA AASAASAY SHIRKADDA

Shirkadda **CRYSTAL TECHNOLOGIES COMPANY**, Waxaa La Aas'aasay 9 Sep 2017, Waxaana Lagu Aas'aasay Magaalada Muqdisho Ee Caasimadda Soomaaliya.

QODOBKA 3-AAD

XARUNTA SHIRKADDA

Xarunta Shirkadda **CRYSTAL TECHNOLOGIES COMPANY**, Waa Magaalada Muqdisho Ee Caasimadda Soomaaliya, Waxayna Xafiisyo Iyo Laamo Ku Yeelan Kartaa Dhammaan Dalka Gudihiisa Iyo Dibaddiisaba.

QODOBKA 4-AAD

NOOCA SHIRKADDA.

Shirkaddani Waa Shirkad Saamiley Xadidan (Limited Liability Company) Haddaba Saamile Kaste Waxuu Mas'uul Ka Yahay Hatidiisa Ku Jirto Shirkadda Inta Ay Dhan tahay.

QODOBKA 5-AAD

UJEEDADA SHIRKADDA

Ujeeddada Shirkaddu Waa:

- Horumarinta Software-rada, Application-nada & Naqshadeentaba.
- Waxay Ka Baahi tiraysa Bulshada & Shirkadaha Daneyna adeegyada Kale Duwan ee Kor Ku Xusan.
- Dhinacyada ay Wax Sameyneyso Waxaa Ka Mid ah Shirkaddaha Korontada, Isbitaalada, Waxbarasahada IWM.
- In ay Dhamaan Wadanka oo dhan ugu baahiso adeegyaddeeda kala Duwan oo dhan Si eey Macaamiil Cusub ugu soo jiidato Kartideeda, tayadeeda iyo hufanaanteeda.
- Abuuridda dakhli cusub oo wax looga qabanayo shaqa la'aanta dalka ku baahsan
- In ay abuurto ila dhaqaale iyo adeegyo ay ku qabsadaan bulshada soomaaliyedd qeybaheeda kala duwan.



QODOBKA 6-AAD
RA'SUMAALKA SHIRKADDA

Raa'sumaalka Shirkadda waa \$100,000 (Boqol Kun Oo Doller) Waxaana ku Talagalka Shirkaddu yahay in Raa'sumaalka Shirkadda La Kordhiyo Ayada Oo Loo Marayo In Sheerer Loo Furo Maalgashadayaasha Cusub.

NO.	MAGACA MILKIILAHA	TIRADA SAMIGA	QIIMAHA SAAMIGA	LACAGTA	BOQOLKIIBA
1-	ABUBAKAR ELMI YUSSUF	100	\$1,000	\$100,000	100%
	TOTAL				100%

QODOBKA 7-AAD
KORDHINTA IYO DHIMIDDA RA'SUMAALKA SHIRKADDA

Maaliyadda shirkadda waa la kordhin kara, waana la dhimi karaa, haddii ay sidaas isku raacaan xubnaha Saamilayda shirkadda lana waafajiyo sharciga shirkadda.

QODOBKA 8-AAD
MAAMULKA SHIRKADDA

Maamulka & Milkiilaha Shirkadda **CRYSTAL TECHNOLOGIES COMPANY** Waa **ABUBAKAR ELMI YUSSUF**, Maamulkeeda iyo Tasarufkeeda Waxaa awood Buuxda u Leh **ABUBAKAR ELMI YUSSUF**, islamarkaana Leh Awooda Fulinta Shirkadda.

QODOBKA 9-AAD
SHARUUDAHA KA MID NOQOSHADA SHIRKADDA

Qofka xubin rasmi ah ka noqon kara shirkadda:-

- Waa Inuu Ogolaansho Ka Haystaa Milkiilaha Shirkadda Si Uu Uga Mid Noqdo Saamileyda.
- Waa Inuu Dhiiba Saamiga U Xadidan Shirkadda Oo Dhamaystiran.
- Waa In Uu Ogolaado, Saxiixana Xeerka Shirkadda.
- Waa In Uuna Dalka Ka Galin Fal Dambiyeed Ama Ficilo Wax U Dhimaaya Sumcada Qofka.

QODOBKA 10-AAD
KA MID NOQOSHADA SAAMILEYDA SHIRKADDA

Qof Walba Oo Ku Darsada Saami Xadidan Shirkadda Buuxiyena Xeerka Kamid Noqoshada Saamileyda, Uuna uu Saxiixo Milkiilaha Shirkadda, Wuxuu Noqonayaa Saamile Ka Diiwaan Gashan Shirkadda.

QODOBKA 11-AAD
IIBINTA SAAMI

Xubin Kasta Waxay Iibin Kartaa Saamigeeda Ay Ku Leedahay Shirkadda, Waxaana Mudnaanta La Wareegidda Koowaad Leh Xubnaha Shirkadda, Haddii Muddo Hal Bil Ah La Waayo Xubin Ka Mid Ah Shirkadda Oo La Wareegta Saamiga La Iibinayo Saamiluhu Waxaa Uu Xaq U Leeyahay Inuu Ciddii Dalbaneysa Oo Aan Wadanka Danbi Ka Galin Ka Iibiyo Ka dib Marku Aqbaloo uuna Saxiixo Milkiilaha Shirkadda.

QODOBKA 12-AAD
LUMINTA XUBIN NIMADA

- Inuu Qoraal Ku Soo Codsado Ka Bixidda Saamileyda Shirkadda.
- Haddii uu ku xad gudbo xeerka iyo nidaamka u degsan shirkadda.
- Haddii ay ku caddaato inuu ku takhalufay hantida ama magaca shirkadda.
- Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamileyda waxaa loo celinayaa xaquuqdiisa faa'ido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka.



QODOBKA 13-AAD
FADHIYADA SAAMILEYDA

Fadhiyada saamileyda waxay u dhacayaan sida soo socota:-

1. Kulamada Caadiga Ah Ee Saamileyda Waxay Dhacayaan Sanadkiiba Mar.
2. Kulamada Aan Caadiga Ahayn, Milkiilaha Waxaa Uu Iskugu Yeeri Karaa Kulamo Deg Deg Ah Haddii Loo Baahdo, Sidoo Kale Haddii Ay Isku Raacaan Xubnaha Shirkadda.
- 1- Xubin Walba Waxay Xaq U Leedahay In La Soo Gaarsiyo Ogeysiis Kulanka Caadiga Ah Muddo Bil Ka Hor

QODOBKA 14-AAD
CODKA SAAMILEEYDA

Codka Saamileyda Shirkadda Waxaa Loo Raacayaa Laguna Qaadanayaa Hal-Dheeri Haddii Ay Isla Ekaadaan Oo Ay Is Garab Dhacaan Xubnaha Shirkadda Ee Wax Dooranaya Waxaa Loo Raacayaa Dhinaca Milkiilaha La Jiro Taas Oo Noqoneysa Aqlabiyadda Saxda Ah.

QODOBKA 15-AAD
ILAHA MAALGALINTA SHIRKADDA

Ilaaha Maalgelinta Shirkadda Waa Maalgelinta Saamileyda, iyo Deymaha Waafaqsan Shareecada Islaamka.

QODOBKA 16-AAD
XISAABTA SHIRKADDA

- 1- Xisaab Xirka Shirkadda:- Xisaabta Shirkadda Waxaa La Xirayaa 31 Ka December Ee Sanadkasta Dhammaadkiisa.
- 2- Zekada:- Xisaab Xirka Ka Dib, Inta Aan La Qeybin Faa'idada Iyo Khasaaraha Waxaa Laga Bixinayaa Zekada Ku Waajibtay Hantida Shirkadda Waxaana Masuulideeda Leh Maamulka Shirkadda (Executive Director).
- 3- Qeybsiga Faa'idada Iyo Khasaaraha:- Qeybsiga Faa'idada Iyo Khasaaraha Waxaa Lagu Jaangoynayaa Saamiga Ay Xubin Kasta Ku Leedahay Hantida Shirkadda. Waxaana La Qeybinayaa 31 Janaayo.

QODOBKA 17-AAD
XUBINTII GEERIYOOTA

Xubinta Geeriyoota Oo Ka Mid Ah Saamileyda Shirkadda Waxaa Saamigiisa Xaq U Yeelanaya Dhaxaltooyadiisa Sharciga Ah, Oo Ay Soo Caddeeyso Maxkamad, Kadib Waxay Soo Magacaabanayaan Wakiil Haddii Ay Ogolaadaan In Shirkadda Ay Kasii Mid Ahaadaan, Sidoo Kale Haddii Ay Dalbadaan In Saamigooda La Baxaan Sanadka Xisaabeedka Markii Uu Dhamaado Ayaa Loo Bixinayaa Saamigooda.

QODOBKA 18- AAD
MUDADA JIRITAANKA SHIRKADDA.

Mudada Jiritaanka Shirkadda waa 50 Sano.

QODOBKA 19- AAD
BAABI'IDDA SHIRKADDA

Shirkadda Waxay Ku Baabi'i Kartaa Marka Ay Timaado Xaladaha Hoos Ku Xusan:-

1. Haddii Ay Dhammaan Xubnaha Shirkadda Isku Raacaan Baabi'inta Shirkadda.
2. Haddii Uu Burbur Ku Yimaado Dhammaan Hantida Shirkadda.
3. Haddii Ay Soo Wajahdo Hoos U Dhaac Maaliyadeed Ayna Weydo Kabidda Saamileyda.
4. Haddii Uu Soo Baxo Sharci Baabi'inta Shirkadda Nuucaan Ah.



QODOBKA 20-AAD

HABKA UU KU DHACAYO BAABI'IDA SHIRKADDA

Baabi'idda shirkadda waxaa uu ku dhacayaa sida soo socota:-

1. Diyaarinta heerka maaliyadeed ee shirkadda.
2. Bixinta daymaha shirkadda lagu leeyahay.
3. Khasaaraha wuxuu ahaanaya hadba inta boqolkiiba uu saamigiisu la'eg yahay qofka.

QODOBKA 21-AAD

GUDOOMINTA SHIRARKA

Shirarka Kala Duwan Ee Shirkadda, Waxaa Shir Gudoominaya Milkiilaha Shirkadda, Haddii Uu Maqan Yahay Waxaa Shirarka Gudoominaya Cidii oo si qoraal ah ugu wakiisho Milkiilaha Shirkadda

QODOBKA 23-AAD

MABAADI'DA SHIRKADDA

Shirkadda Waxaa aas aas u ah in eey Ku Hoowlgasho Qodobadaan Soo Socda:-

- Cadaalad
- Is aaminaad
- Isla Xisaabtan
- Is Xaq Dhoowr
- Is dhax gal
- Musuuliyad
- Iyo Xafidaada Sirta Shirkadda.
- Codsado Ka Bixidda Saamileyda Shirkadda.

QODOBKA 22-AAD

WAXYAABAHA AAN LAGU XUSIN XEERKAN

Dhammaan waxaa aan lagu sheegin xeerkan waxaa loola noqonaya sharciga islaamka qeybta mucaamalaadka iyo shirkaddaha, sidoo kale qawaaniinta dalka u degsan.

- F.g wixii shareecada islaamka ka hor imaanaya waa waxba kama jiraan.

QODOBKA 24-AAD

ISTICMAALIDDA MAGACA SHIRKADDA

Magaca Shirkadda Ayaa Loo Isticmaalayaa Dhammaan Hantida Shirkadda Sida: Guryaha, Dhulalka, Gaadiidka, Bank Account, Heshiisyadda, Tiimbarayaasha Iwm.

QODOBKA 25

HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY


25 QODOB 1 COVER, 6 BOG IYO 2 NUUQ, OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.



ABUBAKAR ELMI YUSSUF

SAXIIXA MILKIILAHA

[Handwritten signature]



(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1112/T.P.N/24, Tr. 06/08/2024, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Waxaan Sugayaa In Saxiixa Kor Ku Xusan Ay Yihiin Saxiixii Runta Ahaa Waxaan Halkan Ku Caddeynayaa In Heshiiskan Dhismaha Sharciga Shirkadda Ee Kor Ku Xusan Uu Yahay Mid Sax Ah Oo Waafaqsan Shareecada Islaamka Iyo Shuruucda Madaniga Ah Ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Islamarkaana Uu Saxiixay Milkiilaha Shirkadda Nootaayaduna Waxey Hubisay Magacaas In Uu Yahay Kii Dhabta Ahaa Ee Lahaa Saxiixa Kor Ku Xusan, Waxaana Lagu Qoray Diiwaanka Guud Ee Nootaayada.



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"

[Handwritten signature]






AS43453



DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU
WARQADDA SUGNAANTA
 Certificate of Identity Confirmation

DUQA MAGAALADA MUQDISHO WUXUU CADEYNAYAA IN SAWIRKA IYO SUUL SAARIDDA HOOS KU TILMAAMAN UU YAHAY QOFKA HOOS KU XUSAN:
 (The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears below has the following details:)

MAGACA Full Name	ABUBAKAR ELMI YUSSUF
TAARIKHDA DHALASHADA Date of Birth	14-Jun-1984
GOOBTA DHALASHADA Place of Birth	GARRISA
NUMBERKA KAARKA AQOONSIGA ID number	664731
JINSI Gender	Male
XAALADDA GUURKA Marital Status	Married
DEGGAN Address	Wadajir
MAGACA HOYADA Mother's full Name	GAMANA HAJI HUSSEIN
TAARIKHDA LA BIXIYAY Date of Issue	1-Aug-2024
SHAQADA Occupation	EMPLOYEE



Right Thumb Print



Duqa Magaalada ee Muqdisho
 Mayor of Mogadishu
Yuusuf Xuseen Jimcaale



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA
WASAARADDA GANACSIGA IYO WARSHADAHA



جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة التجارة والصناعة

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
MINISTRY OF COMMERCE AND INDUSTRY

To
The Director(s)
CRYSTAL TECHNOLOGIES LIMITED
Hodan, Mogadishu

THE COMPANIES LAW, 2019

Records relating to the below company held by the Companies Registry
as at 07-08-2024

COMPANY	CRYSTAL TECHNOLOGIES LIMITED
COMPANY NUMBER	18833013480
NOMINAL SHARE CAPITAL	100,000
NUMBER AND TYPE OF SHARES(VALUE PER SHARE)	Ordinary: 100 (USD 1000 EACH)
DATE OF REGISTRATION	07/08/2024
POSTAL ADDRESS	Hodan, Mogadishu

Name of Directors and Shareholders of the above company with their particulars are
as follows

NAME	DESCRIPTION	ADDRESS	NATIONALITY	SHARES
Abubakar Elmi Yussuf	Director Shareholder	Hodan	Somalia	Ordinary: 100
TOTAL				100





FOOMKA BIXINTA CADDEYN SHIRKAD

REP.1112/TPN/2024

Tr, 07/08/2024

Magaca qaadaha: →
Meeshuu deganyahay →

Abubakar Elim Yusuf

Telfoonkiisa: →

002547 23546 868

Waxaan Cadeynyaaa Anigo Maskaxdeedu
Taam Tahay in Xafiiska Nootaayo Tayo aan
Ka Qaatay Warqad caddeyn Shirkad Ah Ref
Nambarkiisu Sare Ku Xusan yahya.

FA. Maxaad usii geyso
Safar Hotel

SAXIIXA BIXIYAHA:

SAXIIXA QAADAHA:
